

Xeerarka Anshaxa Jinsiga ee Shaqaalaha Hay'adaha Gargaarka

Shaqaalaha gargaarka waa loo **ganaaxi karaa – waana lagu ruqsayn karaa**- hadday ku kacaan falal jinsi oo aan la aqbali karin. Waana kuwan xeerarka la rabo inay ku dhaqmaan:

- Shaqaalaha gargaarka **looma oggola inay xiriir jinsi la yeeshaan qof ka yar 18 sano, xitaa haddii sharciga dalkoodu saamaxayo**. Inay yiraahdaan maanan ogayn qofka da'diisana ma aha cudur daar.
- Shaqaalaha gargaarka looma oggola galmo ganacsi ah oo lacag, shaqo, badeeco ama adeeg la dhaafsado – kuwanoo ay ku jiraan alaabta iyo adeegga mucaawanada dadka dhibaaataysan loogu talagalay. Waa in aysa adeegsan ballanqaadyo alaab ama adeegyadaas ah si ay ugu qanciyaan dad kale inay aqbalaan dhaqan kastoo hoos u dhigaya ama dullaynaya dadkaas. Taana waxaa ka mid ah in dadka jirkooda ka ganacsada la siiyo ama loo bandhigo lacag.
- Shaqaalaha gargaarku waxay saameyn ku leeyihiin dadka hela alaabta iyo adeegyada mucaawinada ah. Tanina waxay ka dhigaysaa dadkaas kuwo ka awood sarreeya kuwa u baahan gargaarka. Sababtaa darteed ayaa hay'adaha **gargaarku waxay si xooggan ugu dhiirrigeliyaan shaqaalohooda inaanay innaba xiriir jinsi la yeelan karin dadka dhibaataysan**. Xiriirkaasina wuxuu u muujinayaa howlaha gargaarka kuwo hufnaan yar oo aan la aamini karin.
- Haddii ruux shaqaale gargaar ahi ku **shakiyo** in mid ka mid ah shaqaalohooda ama shaqaale hay'ad kale uu jebinayo xeerarka hay'adda gargaarka ee dhaqanka jinsiga, **waa inuu soo sheego** si waafaqsan habraaca u deggan hay'adda.
- Shaqaalaha gargaarku **waa inay abuuraan misna dhowraanna goob shaqo** oo ka hortagta dhaqammada jinsiga ee aan la aqbali karin kuna dhiirrigelisaa shaqaalaha inay u dhaqmaan si waafaqsan **xeerarka anshaxa**. Dhammaan maareeyeyaashu waxay ka mas'uul yihiin inay taageeraan oo dejiyaan nidaamyo dhowra goobtaas.

Qawaaniinta IASC ee xadgudubyada jinsiga waxaa laga heli karaan halkan:

http://www.pseataaskforce.org/uploads/tools/sixcoreprinciplesrelatingtosea_iasc_english.doc.

Xeerarkan afka ingiriiska caadiga ah waxaa wada jir ugu diyaariyey Kooxda IASC ee Xisaabtanka Dadka Dhibaataysan iyo ka Hortagga Xadgudubyada Jinsiga iyo Tarjumeyaasha aan Xuduudda lahayn